

# Fariimaha Tusaale ee WhatsApp

**Ma rabtaa inaad isticmaasho WhatsApp si aad u faafiso warka ku saabsan Washington HAF?) Hagaag! Halkan waxa ah qaar fariimo tusaale ah ood koobi gareyn karto kuna dhaqmi karto.**

## **Fariinta tusaalaha lambar 1 (Qeyb dheer)**

Salaan ka dib, waa **[magacaaga]** ka socoto **[hey'addaada]**. Looma baahna inaad u jawaabto kooxdan halkan ku wada hadleysa maxaa yeelay waa modwduuc xasaasi ah. Laakinse waxan rabaa inuu qof kasta ogaado in barnaamijkan loogu talo galay dadka la halgamaya bixinta lacagta deynta guriga. Haddii adiga ama qof aad taqaano ku sugan tihiin xaaladdaasi, fadlan la socodsii iney jirto lacagta mucaawinada Washington Homeowner Assistance Fund (oo sidoo kale loogu yeero Washington HAF). Waxa ugu wanaagsan eed sameyn karto waa inaad wacdo lambarka guri lahaanshaha 1-877-894-4663 si ay uga fakaraan sida ugu wanaagsan ee ay kuu caawini karaan, haddii ay noqon laheyd lacag-siin ama kaalmo xagga sharciga ah, iwm. Waan hubinay waana lacag la'aan dhammaanteed, qarsoodi ah, iyo aamin ah inaad soo wici karto. Taageero waxay diyaar ku tahay in ka badan 200 luqadood, MANA loo baahna inaad tahay muwaadin Mareykan si aad u codsato. Waxa jira waxyaabo badan ee been qiyaano ah, laakinse tani kama mid aha! Haddaadan dareemeynin inaad ku faraxsan tahay inaad hore ka soo wacdo lambarka hotline-ka, waxad wax badan ka ogaan kartaa [washingtonhaf.org/so](https://www.washingtonhaf.org/so).

## **Fariinta tusaalah lambar 2 (Qeyb kooban)**

Oo kuu ogaalanaya inaad wax kasta ka ogaato barnaamijka loogu talo galay dadka gobolka Washington ee la halgamaya iska bixinta deynta guriga. Wac 1-877-894-4663 ama booqo [washingtonhaf.org/so](https://www.washingtonhaf.org/so) si aad wax uga ogaato sida loo dalban karo lacagaha iyo taageero. Tani waa mid gebi ahaanba sharci ah, amaan ah, iyo qarsoodi MANA loo baahna inaad muwaadin Mareykan tahay!

Waa ku mahadsan tahay inaad baahiso warkan! Fadlan sidoo kale ka degso oo dadka la wadaag su'aalaha badanaa la isweydiiyo (FAQ) iyo waxyaabo kale halkan [washingtonhaf.org/so](https://www.washingtonhaf.org/so).